Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

WFP ayaa degdeg ugu baahan 217,000 metrik ton oo cunto ah – US$ 218 milyan oo doolar – oo ay ku quudiso 3.5 milyan oo qof marka la gaaro dhammaadka bisha Oktoobar oo uu kaydka hadda yaalla uu dhammaanayo. Qiimeyntii ugu dambeysey ee Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) ayaa tibaaxdey in kalabar dadka Soomaaliyeed, ama 3.8 milyan oo qof – kuwaas oo18 boqolkiiba ay ku korodhey tiradii 3.2 milyanka ahayd ee ay ahaayeen lix bilood ka hor – ay u baahan yihiin gargaar. WFP waxa ay ku baaqdey in deeqo la helo si loo baajiyo dhibaatooyinka bani'aadamnimada ee Soomaaliya ku soo fool leh.

29kii iyo 30kii Agoosto, ilaa 16 Soomaali ah ayaa ku dhintey iyaga oo ka gudbaya Gacanka Cadmeed markii ay tahriibiyeyaashu ay dhinac ka mid ah doonta ay dad ka tureen. Dhacdo kale, ayaa tahriibiyeyaal ka baqey in ay arkaan Madaxda Yaman ay ku khasbeen in ka badan 40 qof oo rakaabkii doonida ahaa in u dabaashaan xeebta; saddex qof ayaa maashoodey saddex kalena waa la la' yahay waxaana la aaminsan yahay in ay dhinteen. Ilaa bishii Jannaayo, in ka badan 36,000 oo qof, oo ay ku jiraan ugu yaraan 16,000 oo Soomaali ah ayaa isku dayey safarkaa halista ah, oo ku kacaya inta u dhaxayse US$ 120 – 130. Xaaladda nabadgelyo-xumada iyo abaarta ka jirta Soomaaliya ayaa ah cunsurada ugu muhiimsan ee dadka ku khasbaya in ay nolol tooda dhaanta ka raadsadaan Yaman iyo meelo ka fogba; badi muhaajiriintan waxa ay ka yimaadeen gobollada Koonfurta/Bartamaha dalka.

Qaxooti Soomaaliyeed ayaa weli ku sii qulqulaya xerooyinka qaxootigu buux-dhaafiyeen ee Dhadhaab ee ku yaalla waqooyiga bari ee Kenya. In ka badan 45,000 oo qaxooti cusub ah oo ka yimid Soomaaliya ayaa la diiwaan-geliyey sanadkan, kuwaas oo badidoodu ka yimaadeen gobollada Koonfurta/Bartamaha gaar ahaan Muqdisho. Dhammaadkii Agoosto, tirada guud ee dadka ku jira Dhadhaab waxa ay ahaayeen 288,000 oo qof, taas oo ka dhigan in 23 boqolkiiba ay ku kordheen tan iyo bishii Jannaayo. Qaxootigu waxa ay ku nool yihiin xaalado wasakh iyo qashin badan oo ay keeneen adeegyadii aasaasiga ahaa oo maqan iyo tirada dadka ee xad-dhaafka ah ee xerada buux-dhaafiyey. Hay'adaha ka shaqeeya degaanka ayaa ka digey xaalad degdeg ah oo caafimaadka dadweynaha ah oo ka dhacda xerooyinkaa, taas oo u baahanaysa in degdeg wax looga qabto. 3dii Sebtembar, ururka *Oxfam International* ayaa war-saxaafadeed uu soo saarey ku yiri, "Soomaalidu waxa ay ka soo cararayaan mid ka mid ah iska-horimaadyada ugu xun iyo abaarta ugu ba'an dunida oo dhan, iyaga oo marka dambena soo gaara un xerooyin ay ka jiraan xaalado aan maskaxda la gelin karin oo aanu bani'aadmi ku noolaan karin…" Waxa ay ugu baaqeen bulshada caalamku in ay ku dadaasho joojinta silica Soomaaliya ka jira. Bishii Agoosto, UNHCR iyo IOM waxa ay 3,258 qof oo ka mid ah 12,900 oo qaxooti Soomaali ah ka wareejiyeen xerada Dhadhaab waxaana ay geeyeen xerada Kakuma, ee waqooyi-galbeed Kenya, si ay u fududeeyaan xaaladda isdul-saarnaanta dadka ee halkaa ka jirta.

Tirada guud ee Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Soomaaliya ayaa hadda ah 1.55 milyan dalka dhan iyada oo 524,000 ay joogaan waddada Afgooye. Haseyeeshee, UNHCR ayaa aad ugu celcelisey in tirooyinkan la bixiyey ay yihiin qiyaas ayna badanaaba ku fadhiyaan macluumaad lagu heley nidaamka La-socodka Dhaqdhaqaaqa Dadka, oo ah nidaam loo diyaariyey in lagu ogaado dhaqdhaqaaqa ee aan loogu talogelin in lagu ogaado wadarta guud ee dadka.

28kii Agoosto, Xarun Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka ah ayaa Jamaame, gobolka Jubbada Dhexe, ay ku weerareen maleeshiyo hubeysan oo bililiqeystey qalabkii qaboojinta ee lagu keydinayey tallaallada.

Waxqabadka

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 554 metrik ton oo cunto ah u qaybiyey 53,500 ka-faa'iideystayaal ah oo hoos imaanayey barnaamijyo kala duwan oo laga fuliyey gobollada Sool, Sanaag, Togdheer iyo Awdal ee Somaliland. Degmada Iskushuban, Puntland, 1,400 ka-faa'iideystayaal ah ayaa ku heley 18 metrik ton oo cunto hoos imaneysey barnaamijka cunto-tababar-ku-beddelashada, halka gobollada Bakool, Baay iyo Gedo, ee Koonfurta/Bartamaha ay ilaa 13,500 oo qof ay cunto ku heleen. Ugu yaraan 42,600 oo carruur ka yar 5 sano jir ayaa ka-faa'iideystey barnaamij quudinta guud ee dheeriga ah ee gobollada Mudug iyo Galgaduud. Degmooyinka Xagar iyo Afmadow, ee gobolka Jubbada Hoose, ayaa 4,200 ay ku heleen badeecooyin cunto hoos imaneysey barnaamijka quudinta dheeriga ah.

Ilaa 15,000 oo qof ayaa ka-faa'iideysanaya shaqo cunto/lacag ku beddelesho iyo waxqabadyada daymaha yaryar ee Somaliland ee ay taageeraan UNDP, *Danish Refugee Council* iyo *Action Aid*. Arrintan ayaa siineysa cuntadii iyo lacagtii ay aadka ugu baahnaayeen qoysaska ay saameeyeen abaaraha ba'an iyo dhaqaale-xumada.

30kii Agoosto, hay'adda *Meryc Corps* ayaa bilowdey 60 musqulood oo ay ka dhiseyso saddex tuulo oo ay abaartu saameysey oo ku yaalla degmada Boosaaso, Puntland si ay uga faa'iideystaan ilaa iyo 2,000 oo qof.

Toddobaadka dhexdiisa, UNICEF iyo la-hawgalayaasheeda ayaa 7,500 oo carruurta Dadka Gudaha Ku Barokacay ee ay da'doodu ka yar tahay shan sano jirka ee ku nool Baydhabo, gobolka Baay, gaarsiiyey buskud ay tamartu ku badan tahay oo marmar la qeybiyo si loogu kaabo quudkooda joogtada ah.

Wareeggii saddexaad ee qaybinta Plumpy'doz oo ah cunto hodon ku ah nafaqada, ayaa toddobaadka dhexdiisa lagu soo dhammeystirey dhammaan degaannadii la beegsadey ee Somaliland, iyada oo la gaarey 14,500 oo carruur ah. Puntland, ku dhowaad 10,000 oo carruur ah ayaa laga baarey nafaqo-xumo oo la siiney UNIMIX – oo ah cunto dheeri ah.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org